



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXA AFADEED 009/2009

Ergayga gaarka ah ee Qaramadda Midoway oo ku baaqay in taageero buuxda la siiyo dawlada cusub ee Soomaaliyeed

New York, 13 Maars 2009 - Ergayga gaarka ah ee Qaramadda Midaway u qaabilsan arrimaha Soomaaliya Amedou Ould-Abdalla ayaa ugu hambalyeyey xukuumada cusub ee Soomaaliya talaabooyinkii horumarka lahaa ee ay gaartay bishii la soo dhaafay, wuxuuna ku guubaabiyey xukuumada inay ku sii socoto wadada lagu gaarayo nabadda iyo xasloonida.

“Madaxweyne Shariif Sheekh Axmed, Afhayeenkha baarlamaanka iyo Ra’isal wasaaruhuba waxay ka muujiyeen dhamaan dhinacyada oo dhan hogaamin mas’uuliyadi ay ku dheehan tahay . xukuumada midnimada qaran lehna hadda waxay hadda ku howlgalaysaa caasimada halkaasoo ay ku shaqeynayso” ayuu yiri Ahmedou Ould-Abdallah. “Waxaan ku faraxsanahay xubnaha baarlaamka ee wadaniyiinta ah kuwaasoo ku noqday Moqdishu si ay halkaasi shaqadooda uga sii wadataan, labada qeybood ee maamulkuba waxay ubaahan yihin kaalmo la taaban karo diplomacyadeed iyo mid maadi ah.

“Golaha wasiirada waxay kulmeen dhowr jeer waxayna isku raaceen talaabooyin muhiim ah oo ay ka mid tahay hirgelinta shareecada Islaamka.

“Dhamaan arrimahan soo kordhay oo dhan ma ahan oo keliya kuwa un waxka geysanaayo u dhaqaaqida dhinaca nabad ku soo celinta wadanka gudihiisa ah, laakiin waxaa kale oo ay gacan ka geysanayaan soo celinta magaca iyo muuqaalka ummadda Soomaaliyeed ee dibadda. Waqtigan hadda la taagan yahay, gebihaanba ma jirto wax cudurdaar ah ee u ogolaanaya ruux kasta oo Soomaali ah inuu sii wado shirqoolka lagu burburinaayo nolosha dad Soomaaliyeed oo hor leh”.

Ould-Abdallah wuxuu sheegay inuu hadda socda qorshe lagu qabanaayo shirkii labaad ee guddiga arrimaha heerka sare kaasoo shaqadiisu ay tahay inuu hoos u eego iskaashiga siyaasadeed, cadaalada iyo dib u heshiisiinta waxaa kale oo uu sheegay in waqtii dhow laqab doono shir uu yeelan doono guddiga wadajirka arrimaha nabadgelyada.

“Waxaan ku faraxsanahay inaan arko in Soomaalida intee badan oo isla jirta oo wada shaqeynaysa markii ugu horeysay mudo badan kana shaqeynaysa ariimo muhiim u ah mustaqbalkooda”. Ayii yiri Ould-Abdallah. “Bulshada caalamku, waa in ay dhinaceeda gudataa waajibaadkeeda si buuxdana u taageertaa xukuumada cusub. Kaalmadan aan ka hadlayo maahan mid mustaqbalka ee waa mid hadda loo baahan yahay. Ma jirto wado kale oo aan ahayn in la taageero maamulkan loona mariyaa isaga kaalmada dadkeeda ku socota.

“ Madaxweyne Axmed wuxuu kaalmo balanqaadyo ah ka helay Afrika, Bariga dhexe, Yurub, Mareykanka iyo meelo kale waana talaabo aad geesinimo gelibteeda u leh. Soomaaliya hadda si buuxda ay dib ugu soo noqotay ajanada bulshada cxaalamka waxaana arinteeda ka hadli doona Golaha Amaanka 20 Maarso sidoo kalena waxaa looga hadli doonaa kulan madaxeedka soo socda ee wadamada Carabta laguna qaban doono QADAR”.